



MASHRUUCA ADKAYSIGA BIYAHA HOOSE EE GEESKA AFRIKA

ABAAR-TIR -Somaliland

**KA-FAA'IIDAYSIGA IYO TACADDIGA GALMADA/QORSHE-
HAWLEEDKA KA FALCELINTA IYO KA HORTAGGA
TACADDIYADA GALMADA**

GOOBTA: MAROODI JEEB, TOGDHEER IYO AWDAL.

XADDIGA KHATARAHA LAGU OGAADAY QIIMAYNTA: ASAASI

HORDHAC

Mashruuca Adkaysiga Biyaha Hoose ee Geeska Afrika waxa uu qayb ka yahay Mashruuc hal-abuureed oo heer gobol ah, kaasi oo loo qorsheeyay inay fuliyaan dalalka Kiinya, Itoobiya, Soomaaliya, Jabuuti, Suudaan Somaliland iyo urur goboleedka IGAD. Mashruucu waxa uu xooga saarayaa qaybinta iyo isticmaalka ka qayb qaadashada biyaha heer bulsheed ee maamulka, hawlgalka iyo dayactirka biyaha dhulka hoostiisa, waxqabadyada kaabayaasha dhaqaale ee wixtarka leh, xogta iyo aqoonta adkaysiga biyaha hoose, iyo sida oo kale dhisidda awoodda hay'adaha si loo hubiyo helitaan loo dhan yahay iyo waaritaanka kheyraadka dabiiciga ah.



Mashruucan waxaa la filayaa in uu kor u qaado helida biyo nadiif ah, iyada oo loo marayo maalgelinta baahiyaha degdega ah ee fayadhowrka iyo nadaafada. Mashruucu waxa uu samayn doonaa sahanno juquraafiyeed, kuwa adkaysiga biyaha hoose iyo muuqaalka guud ee dhulka si loo ogaado meesha ay ku yaaliin dhul-biyoodka muhiimka ah si loo kordhiyo xadiga tayada adkaysiga Biyaha hoose ee u jira dhulka. Mashruucu wuxuu sida oo kale lagu tababari doonaa shaqaale xirfadlayaal ah, waxa uu dhisi doonaa xafiisyo lagu ogaado adkaysiga Biyaha hoose si loo helo xogta iyo maareynta loo baahan yahay.

Qorshe hawleedkani waxa uu faahfaahinayaa tallaabooyinka hawlgelinta ee lagama maarmaanka ah iyo hab-maamuuska la dejin doono si wax looga qabto uga-faa'iidaysiga galmada iyo xadgudubka ka dhanka ah jinsiga (UFGXJ). Waxaa ku jiri doona sida loo xalliyo eedeymaha uga faa'iidaysiga galmada iyo xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga, sida oo kale, nidaamyada looga hortagayo loogana jawaabay UFGXJ, sida cabashooyinka UFGXJ loo maarayn doono (habraacyada baadhista), iyo tallaabada edbinta ee xadgudubka Xeerka ee shaqaalaha.

QEEXIDDA EREYBIXINTA:

Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Inter-Agency (IASC) waxa ay ku qeexaan **xadgudubka ka dhanka ah jinsiga**: fal kasta oo waxyeello leh oo lagu sameeyo si ka baxsan rabitaanka qofka, taas oo ku saleysan kala duwanaanshaha bulsheed (jinsi) ee u dhexeeya ragga iyo dumarka. Xadgudubyada ka dhanka haweenka waxa ay si balaadhan u koobtaa Muuqaalka guud ee qofka, galmada, dhaqaalaha, xadgudub maskaxeed/dareen/xadgudubyo ay ku jiraan hanjabaad, khasab iyo dhaqamada waxyeelada leh ee ka dhex dhaca shakhsiyaadka, qoysaska iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda. Kuwaas waxaa ka mid ah rabshadaha galmada, rabshadaha qoyska ama kuwa ka dhaca lamaanayaasha. Sida oo kale waxaa jira dhibaatooyin kale oo ay kamid yihiin ka ganacsiga arimaha jinsiga ee dumarka, khasbida guurkii hore, iyo dhaqamada kale ee soo jireenka ah ee waxyeelooyinka keena.

Ururka Qaramada Midoobay waxa ay ku qeexday "**ka faa'iidaysiga galmada**" iskuday kasta oo xadgudub ah oo loo isticmaalo kuwa u nugul, kala duwaananshaha awoodeed ama aaminaadda,



ku timaada ujeedooyin galmo, laakiin aan ku xaddidnayn, ka faa'iidsiga lacag ahaan, bulsho ahaan ama siyaasad ahaan kaga faa'iidsiga galmo ee qof kale. **Xad-gudubka galmo** dhinaca kale waa "xadgudubka dhabta ah ama hanjabaadda ah ee jireed ama galmo, ha ahaato xoog ama xeelad kale oo khasab ah." sidaas darteed uga faa'iidsiga galmada waa nooc ka mid ah xadgudubyada ku salaysan jinsiga guud ahaanna waxa ay tixraacdaa falalka liddigu ku ah ka faa'iidaystayaasha mashruuca ee ay sameeyaan shaqaalaha, qandaraaslayaasha, la taliyayaasha, shaqaalaha iyo la-hawlgalayaasha.

DHIBAATAYNTA GALMADA:

waxaa lagu qeexaa galmo kasta oo aan sharci ahayn oo soo marin codsi galmo, mid dhaqan, af ama jireed, muujin dabecad galmo, ama dhaqan kasta oo kale oo dabecad galmo ah oo laga yaabo in si macquul ah loo filayo ama loo arko in ay gaf ama ceebayn qof kale tahay, marka hab dhaqanka noocaas ahi uu soo farageliyo shaqada oo laga dhigo jewi khasab ah oo cabsi gelin ah.

MACNAHA GUUD EE KHATARAHA XADGUDUBYADA KU SALAYSAN JINSIGA:

Xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ)¹ waa xadgudubyada ugu baahsan aduunka ee xuquuqda aadanaha kuwaas oo kor uqaada dhibaatooyinka saamiyada cudurrada safmarka ah ee caafimadka dadwaynaha, GBV waxa ay saamaysaa raga, dumarka iyo caruurta, laakiin waxa ay ay inta ugu badan saamaysaa dumarka iyo hablaha waxayna ka jirtaa deegaan kasta.

Xadgudubyadani waxa ay qayb ka yihiin nolol maalmeedka haweenka iyo carruurta waxayna ka dhacaan guryaha iyo goobaha shaqada waxayna dhacaan iyadoo aan loo eegin in dalku uu ka jiro colaad, qalalaase ama xasilooni. Qaar ka mid ah noocyada XSJ waa kuwo caadi ka ah Soomaaliya, oo ay ka midyihiin Gudniinka Fircooniga ah, guurka carruurta, iyo rabshadaha lammaanaha, gaar

¹ Xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ) waxaa ay isugu jiraan xadgudubyo tiro ah oo ay ka mid yihiin i) baqdingelinta lammaane oo gacanqaad la xidhiidhta; ii) tacaddi galmo oo loo geysto qof aan lammaane ahayn; iii) hab-dhaqan dhibaateyn leh; iv) tahriibin iyo v) tacaddiga galmo ee loo geysto carruurta. Waxaa la filayaa in hannaanka meelmarinta ee heer dal iyo heer gobol ay bidhaamin doonaan qaababka u badan ee XSJ, iyada oo dal walbaa oo tixgelinayo sida uu wax uga qabandoono khatarahaan sida ugu habboon

<http://www.worldbank.org/content/dam/Worldbank/document/Gender/Arango%20et%20al%202014.%20Interventions%20to%20Prevent%20or%20Reduce%20VAWG%20-%20A%20Systematic%20Review%20of%20Reviews.pdf>



ahaan adeegsiga xadgudubyada jidheed ee ninku u adeegsado si uu u edbiyo ama u xakameeyo xaaladaha qaarkood.²

Xadgudubyada galmada iyo noocyada rabshadaha kale ayaa la sheegay in ay caadi ka noqdeen Soomaalida. Taas oo u muuqataa inay ka dhalatay la kulanka joogtada ah ee heerarka sare u kaca xadgudubyada galmada tobankii sano ee la soo dhaafay oo ay u sii dheer tahay wada-xidhiidh la'aanta heer qaran iyo heer bulsho, jiritaan la'aanta dood iyo wadahadal ku saabsan xadgudubka galmada iyo noocyada kale ee XSJ.³

Caddaymaha waaxda nadaafadda oo sii kordhaya ayaa tilmaamaya cabsida baahsan ama waayo-aragnimada tacadiyada ka dhanka ah haweenka marka la ururinayo biyaha. Dalka waxaa hadda ka jira xaalado abaareed oo laga yaabo inay kordhiyaan culeyska haweenka iyo gabdhaha. Tusaale ahaan, haweenku waa inay masaafo dheer u lugeeyaan si ay biyo u helaan iyadoo ay ugu wacan tahay biyo la'aan halka habluhu ay ka maqan yihiin waxbarashada maadaama qoysaskoodu aanay awoodin inay iska bixiyaan kharashka dugsiga.⁴

Iyadoo qarashada helitaan liidata biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda (WASH) aysan ahayn sababta rabshadaha laakiin waxa ay sii xumeyn kartaa u nuglaanshaha haweenka iyo gabdhaha rabshadaha. Dhacdooyinka XSJ ee Soomaalida waa caqabad muhiim ah oo la taaban karo; Qiimaynta horudhaca ah ee ka faa'iidaysiga iyo xadgudubka galmoodka ee mashruuca laxidhiidha (SEAH) iyo dhibaataaynta galmada ayaa aqoonsaday khataraha soo socda ee la xidhiidha mashruuca ee u baahan in wax laga qabto si loo yareeyo khataraha XSJ/SEAH.

- **Ku-xad-gudubka suurtagalka ah ee awoodda iyo ka faa'iidaysiga galmada ee dhaqamada shaqada:** Shaqaalaysiinta iyo dhaqamada shaqaalaynta ee doonaya in la kordhiyo tirada haweenka ee qorshayaasha shaqada degdegga ah waxa ay soo bandhigi karaan haweenka dhacdooyinka dhiig-miirashada, dhibaataaynta, ama rabshadaha; tusaale



ahaan, markaad u guurto beelaha oo aad la macaamilayso hoggaamiyeyaasha ragga ah (Qabiilka, Iimaanka, iyo Hogaamiyaasha Tuulooyinka) iyo xubnaha bulshada. Intaa waxaa dheer, caadooyinka jinsiga ee aan sinnayn iyo caqiidooyinka waxyeellada leh ayaa halis ugu jira abuurista jawi colaadeed oo loogu talagalay haweenka shaqaalaha ah. Xaaladaha ay shaqaalaha dumarka ah ay haystaan wakhti yar oo ay ku qabtaan shaqada dhaqameed la xidhiidha jinsiga sida daryeelka carruurta, tani waxay sida oo kale horseedi kartaa korodhka suurtagalka ah ee GBV.

- **Haweenka reebista mudnaanta-dejinta iyo hababka go'aan-qaadashada bulshada iyo khataraha XSJ ee la xidhiidha:** ka-reebista goobaha codka, hay'adda iyo go'aan-qaadashada waxa ay horseedi kartaa go'aamo waxyeello kale u geysta haweenka iyo gabdhaha. Mudnaansiinta sinnaanta lab iyo dheddig, gaar ahaan barnaamijka kobcinta awoodda iyo hagidda ee qorsheynta, horumarinta iyo maaraynta adkaysiga biyaha hoose, waxa ay kordhin kartaa khatartooda XSJ haddii aan si sax ah loo qiimeyn baahiyaha kartida ee musharaxiinta haweenka ah ee u qalma.
- **Isku dheeli tirnaan la'aan xaga awooda maamulka ah oo ay shaqsiyaadku uga faa'idaysan karaan danahooda gaarka ah.** waxa ay kordhin kartaa caqabadaha hortaagan ka qaybgalka haweenka ee fursadaha horumarinta xirafadooda. Dabeecadaha dhaqan ee ragga u badan yihiin halka ay ka jiraan fikrado la xidhiidha jinsiga oo ku saabsan dumarka ayaa laga yaabaa in la sii xoojiyo.
- **Kordhinta suurtagalka ah ee xiisadaha bulshada iyo qoyska sababtoo ah meelaha biyaha oo si liidata loo qaabeeyey kuwaas oo aan dareensanayn dhaqdhaqaaqa jinsiga marka la eego macnaha guud waxa ay ka sii dari kartaa ka faa'iidaysiga galmada iyo noocyada kale ee xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ).** Tusaale ahaan, marka dumarka iyo carruurta safaf dhaadheer ugu jiraan meelaha biyaha laga dhaansado waxa ay keeni kartaa dagaal lala galo dadka kale ee adeegsada, gaar ahaan meelaha xooladhaqatada, qaxootiga ama dadka kale ee barokacay ay helaan Biyo ay hore u isticmaali jireen bulshada martida loo yahay. Sida oo kale, dhaqdhaqaaqa qoyska ee sinnaanta jinsiga



ayaa kordhin kara halista rabshadaha iyo waxyeelada guriga ee haweenka, gabdhaha iyo kooxaha kale ee nugul ee si toos ah ama si dadban uga qayb qaadanaya mashruuca.

- **Haweenku waxa ay la kulmi karaan khataro sare oo la xidhiidha xaddidnaanta dhaqdhaqaaqooda.** Tusaale ahaan, qandaraasyada dhismaha fog waxaa ka mid noqon kara haweenka u safraya si ay ugu noolaadaan gudaha ama agagaarka goobaha mashruuca, kuwaas oo laga yaabo inay aad u nugul yihiin sababtoo ah la'aanta shabakad taageero maxalli ah, dhiig-miirashada iyo waxyeellada shakhsiyaadka aan lammaanaha ahayn, oo ay ku jiraan kooxaha gaarka ah, xoogaga hubaysan iyo shakhsiyaadka gaarka ah. Sida oo kale, caqabadaha biyo la, aanta ayaa laga yaabaa inay gacan ka geysato xurgufta u dhexeysa ninka iyo xaaska, gaar ahaan meelaha ay biya yaraantu ka jiraan ama ay abaaruhu saameeyeen, taasi oo hordeedi karta karta colaad.
- **Hababka xalinta khilaafaadka bulshada waxa ay u horseedi karaan waxyeelo badan oo ka dhan kuwa badbaada kuwaas oo soo sheega XSJ (GBV/SEAH) waaya-aragnimooda.**

Nidaamyada xallinta bulshada ama maamulka maxalliga ah waxa ay xoojin karaan sinnaan la'aanta jinsiga iyagoo riixaya go'aamo ballaarinaya sinnaan la'aanta aan dhibanaha udub xal u ahayn - taasoo horseedaysa ciqaab la'aan iyo waxyeello dheeraad ah oo loo geysto dhibanaha (iyada oo loo marayo in loo guuriyo dembiilaha, dib-u-dhibaatayn ama cawaaqib kale).

NIDAAMKA MAARAYTA KHATARAHA EE IMINKA JIRA

Iyada oo la tixraacayo casharradii laga bartay mashruucii Biyoole, mashruuca biyaha dhulka hoostiisaa ah waxa uu abuuri doona sees/aasaas leh tallaabooyin dhawr ah si loo hubiyo ilaalinta dadka iyo bulshada uu khuseeyo mashruucu, kuwaas oo ay ku jiraan hababka lagu xaddido, looga warbixiyo iyo dabagalka xaaladaha suurtagalka ah ee kiisaska ka faa'iidaydiga iyo tacadiyada galmada (SEAH) iyo kiisaska dhibaataynta Galmadda (SH) sida hoos ku xusan.

a) Xeerka Anshaxa



Mashruucu waxa uu hubin doonaa in la sameeyo xeer anshax, sida oo kale dhammaan shaqaalaha mashruuca ee la qorayo waxaa looga baahan yahay in ay qaataan tababar si ay u fahmaan ujeedka ayna u saxiixaan xeerka anshaxa oo si cad u qeexaya dhaqamada mamnuuca ah, sida ka faa'iidaysiga iyo xadgudubka dhanka galmada ah (SEAH) oo aan la aqbali karin goobaha mashruuca. Xeerka anshaxa ee shaqaalaha mashruuca waxa lagu darayaa tababbarka maaraynta halista tacadiyada jinsiga ku salaysan (GBV) oo uu bixin doono Khabiir dhanka tacadiyada ku salaysan jinsiga (GBV-) kaas oo ka socda Somaliland iyo khabiir dhanka arrimaha Bulshada/GBV oo ka socda Somaliland. Xeerka anshaxu waxa uu u hoggaansami doonaa tilmaamaha Qorshaha Maamulka Shaqaalaha (LMP).

b) Habka soo gudbinta

habka loogu soo gudbin karo kormeerayaasha tacadiyada ka dhanka jinsiga kuwa doonaya caawinta ayaa laga hirgaliyay qaar kamid ah gobalada Somaliland, hasa yeeshee waxaa lagama maarmaan ah in maaraynta mashruuca lagu daro habka gudbinta si loo ogaysiiyo shaqaalaha mashruuca iyo qaybaha bulshada adeegyada suuragalka u ah kormeerayaasha hawlaha tacadiyada ku salaysan jinsiga sida taageero caafimaad iyo midda cilmu-nafsiya, Badbaada iyo Amniga, fargalinnada sharci iyo kuwa caafimaad. Waxaa sida oo kale oo jirta baahi loo qabo in la sameeyo, lana faafiyo hababka tabinta warbixinnada rasmiga ah ee u gaarka ah gobol kasta iyo goob kasta, iyadoo la cusboonaysiinayo dariiqooyinka gudbinta tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV), lana kaashanayo wasaaradaha iyo hay'adaha ay khusayso ee bixiya adeegyada tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV), siinta tababarada ku habboon shaqaalaha mashruuca, iyo in lagu ogaysiiyo bulshada halka ka heli karaan adeegyada.

c) Habka Xallinta Cabashada

Mashruucu waxa uu abuuri doonaa Hab-Cabasho (HC), kaas oo wax looga qabanayo cabashooyinka iyo jawaab celinta dhammaan daneeyayaasha ku lugta leh mashruuca. La-tashi bulsho (gaar ahaan haweenka, gabdhaha iyo dadka naafada ah ayaa la samayn doonaa si loo go'aamiyo xalka mudnaanta u leh cabashooyinka shakhsi ahaaneed tusaale, telefoon, online ama



habab kale). Sida oo kale shaqaalaha mashruuca waxaa lala wadaagaya xogta iyo cabashooyinka tacadiyada ku salaysan jinsiga/tacadiyada galmada iyo sida oo kale adeegyada u diyaarka ah, iyada oo la ilaalinayo kalsoonida iyo sirta shaqada. Mashruucu waxa uu tixgalin doonaa casharadii laga bartay mashaariicdii hore si loo adkeeyo isla xisaabtanka sida oo kale waxa uu qeexi doonaa arrimaha muhiimka ah iyada oo la qaban doono kulamo looga niqaashayo arrimahaas.

Waxaa la qeexi doonaa meelaha ay ka imaan karaan tacadiyada galmadu iyada oo la kaashanayo bulshada, si loo ilaaliyo kalsoonida iyo badqabka warbixinnada dhacdooyinka la xidhiidha tacadiyada galmada iyo kuwa ku salaysan jinsiga. Khubarada tacadiyada ku salaysan Jinsiga waxa ay samayn doonaan nidaamyo cadcad oo la xariira kalsoonida, badqabka iyo anshaxa kuwaas oo loo adeegsan doono maraynta cabashooyinka tacadiyada la xidhiidha galmada. Hab-cabasheedka mashruucu waxa uu hubin doonaa in dhammaan dhacdooyinka la xidhiidha tacadiyada Galmada iyo kuwa jinsiga ee dhaca uu ku wargalin doono Bangiga 24 saac gudahood. Waana in macluumaadka lala wadaagayo lagu daro afar qodob oo muhiim ah sida hoos ku xusan;

1. Xogta tirakoobka, sida da'da iyo jinsiga, nooca cabashada (waxa uu cabtuhu ka yiraahdo afkiisa/afkeeda),
2. Haddii cabtuhu uu aaminsanyahay in dambiiluhu uu xidhiidh la lahaa mashruuca.
3. Haddii ay heleen ama la siiyay adeeg.

TALLAABOYINKA LAGAMA MAARMAANKA AH

Mashruucu waxa samayn doonaa nidaam wax looga qabanayo khataraha la xidhiidha tacadiyada ku salaysan Jinsiga iyo kuwa galmada, sida hoos ku xusan;

1. Khariidadayn:

Mashruucu waxa uu qeexi doonaa goob kasta oo laga heli karo kuwa bixiya adeegyada tacaddiyada ku salaysan jinsiga si loogu gudbiyo kuwa wax ka qabanaya tacaddiyadaas waqtiga ugu habboon ayna u siiyaan dhibanayaasha adeegyada ay u baahanyihiin. Kooxda hirgalinta mashruucu waxa ay baari doonaan dhammaan kuwa ku lugta leh mashruuca iyo goobaha laga heli karo. Khariidad



adeeg oo dalka oo dhan ah ayaa la qorsheeyay in la sameeyo iyada oo la adeegsanayo mashruuca Abaartire oo bilaabaya horraanta sannadka soo socda sidaas darteed looma baahna in hadda la galiyo wax kharash ah. Iyadoo adeeg bixiyayaasha ka hortagga iyo ka jawaab celinta xadgudubyada ku salaysan jinsiga /GBV ay ka jiraan dalka, khabiirka tacadiyada ku salaysan Jinsiga/GBV ee mashruucan waxa uu u baahan doonaa inuu xidhiidh la yeesho masruucu wasaarado kale sida Wasaaradda arimaha bulshada iyo shawaqo galinta Wasaaradda shaqo-gelinta, arrimaha bulshada iyo qoska isaga oo adeegsanaya hababka gudbinta ee jira lana wadaagaya kooxda mashruuca. Liiska adeeg bixiyayaasha ayaa la dejin doonaa ka hor inta aan la bilaabin hawlaha dhismaha waxaana la qeexi doonaa daldaloolada muhiimka ah ee u baahan in wax laga qabto.

2. Dhisidda Karaanka/Awoodda:

Qorshe hawleedkani waxa uu diiradda saari doonaa dhisidda awoodda iyo wacyigelinta, waxa uuna ku baraarujin doonaa Habka Cabashada-da iyo Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU), Qandaraaslayaasha, Bulshada, iyo daneeyayaasha kale ee mashruuca muhiimadda ay leedahay arrimaha la xidhiidha xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ/SEAH). Tababarka waxaa ku jiri doona sharraxaad ku saabsan xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ/SEAH), filashada laga qabo dhaqanka iyo akhlaaqda, diidmada xadgudubyada, doorarka iyo mas'uuliyadaha Filayaasha ku lugta leh, hababka warbixinnada dhacdooyinka GBV, la xisaabtanka, iyo hababka gudbinta. Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) -da, gaar ahaan khabiirka tacadiyada ku salaysan Jinsiga/GBV oo uu kormeerayo Bangiga Adduunka, ayaa dib u eegi doona habraaca tababarka iyo isgaarsiinta, waxa ay soo jeedin doonaan talooyin haddii ay jiraan daldaloolo, waxayna qiimeyn doonaan baahida loo qabo hawlaha dabagalka. Kulamada waxaa loo qaban doonaa saddexdii biloodba mar.

3. Ka-qaybgalka iyo La-tashiga Daneeyayaasha

Mashruucu waxa uu la tashi joogto ah la yeelan doonaa qaybaha kala duwan ee wasaaradaha, maamuladda degmooyinka, bixiyayaasha adeega GBV, maamullada deegaanka sida odayaasha,



Gudiga horumarinta Xaafadaha (VDC), iyo Qaybaha kale ee bulshada sida haweenka, dhallinyarada, dadka naafada ah, dadka laga tirada badan yahay, beeralayda, xoolo dhaqatada, Isticmaalayaasha biyo-xilliyeedyada, tusaale, Xoolo-dhaqatada) si ay ugu wargeliyo khataraha xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ) iyo uga Faa'iidaysiga Galmada iyo Xad-gudubyada (SEAH) ee iman kara, hawlaha mashruuca oo ay ku jiraan waddooyinka la heli karo si loogu raadiyo xallinta cabashooyinka iyada oo loo marayo hababka cabashooyinka mashruuca. adeegga bixiyeyaasha XSJ, oo ay ku jiraan ururada qaranka, hay'adaha dawliga ah iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya inay ka jawaabaan tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV), ayaa ka qayb qaadan doona la tashiga. La-tashiyada noocan oo kale ah waxa ay gacan ka geysan doona dhisidda isku-xirnaanta iyo diyaarinta mashruuca si uu uga jawaabo kiisaska xadgudubyada ku salaysan Jinsiga (XSJ) Mashruucu wuxuu sida oo kale qaban doonaa wadahadalo kooxeed joogto ah si loo fahmo khatarta iyo xaddidaadda arrimaha ay shaqaalaha haweenka iyo xubnaha bulshadu kala kulmi karaan deegaankooda shaqada sida ku cad Qorshaha Ka-qaybgalka Daneeyayaasha (SEP). Sida oo kale, mashruucu waxa uu horumarin doonaa habraaca daneeyayaasha siinaya macluumaadka, waxbarashada, iyo isgaarsiinta si loo muujiyo in mashruuca, ama aaggu yahay aag xor ka ah xadgudubyada ku salaysan jinsiga (XSJ)/ Ka-faa'iidaysiga Galmada iyo Xad-gudubyada (SEAH) ah iyo bixinta macluumaadka ku saabsan adeegyada ka jawaab celinta GBV iyo meelaha laga raadsado gargaar marka loo baahdo.

4. Mas'uuliyadaha qandaraaslaha:

Awoodda qandaraaslayaasha si ay u maareeyaan khataraha tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV) Faa'iidaysiga Galmada iyo Xad-gudubyada (SEAH) waa qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshe hawleedka. Sidaa awgeed, khabiir dhanka GBV iyo mid dhanka qandaraasyada ah ayaa hubin doona in shuruudaha iyo filashooyinka Ka Faa'iidaysiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) lagu daray dukumeentiyada tartanka ee qandaraaslayaasha iyo qandaraasle-hoosaadyada. Habka la-xisaabtanka iyo jawaabcelinta qandaraaslayaasha Ka Faa'iidaysiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) waxa lagu qiimayn doonaa qayb ka mid ah qiimaynta tartanka. waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka waxa ay dib u eegi doontaa Qaab-dhismeedka deeganka iyo Bulshada (C-ESMP) si ay u xaqiijiso in talaabooyinka wax ka qabashada Ka Faa'iidaysiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) ayku jiraan habka la-Xisaabtanka iyo Qaabka Jawaabta celinta ee qandaraaslaha Qaab dhismeedka Deegaanka iyo Bulshada (C-ESMP) waxay sida oo kale hubin doonan intaan qandaraaska la dhaamayn in



qandaraaslayaashu ay buuxiyeen shuruudaha ka hortagga iyo ka jawaabcelinta Ka Faa'iidsiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) ee mashruuca. Waxaana arrinkan la hubin doonaa saddexdii biloodba mar.

5. Hannaanka isla-Xisaabtanka ka-Jawaabidda ee la falgalidda dhacdooyinka Ka Faa'iidsiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (GBV/SEAH)

Hannaanku waxa uu faahfaahin doonaa sida mashruucu u maaraynayo ee deymaha SEAH, waxaa la xoojin doonaa hababka soo wargalinta ee deymaha Ka Faa'iidsiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) ee gudaha, dariiqa gudbinta ee loogu gudbiyo badbaadayaasha iyo adeeg bixiyayaasha ku habboon, iyo nidaamyada iyo shuruudaha qarsoodiga ah ee wax ka qabashada dhacdooyinka GBV. Khabiirka GBV waxa uu samayn doonaa habraaca hawlgalka iyo borotokoolka falcelinta si uu u hago sida loo maaraynayo cabashooyinka laga bilaabo qabashada ilaa falcelinta si loo hubiyo in dhacdooyinka GBV/SEAH looga soo warbixiyo si waqtiyaysan. Khabiirka GBV waxa uu hubinayaa in bulshada iyo ka-faa'iidaystayaasha mashruuca lagu wargaliyay in ay jiraan habab kala duwan oo ay lagu soo gudbin karo dhacdooyinka la xidhiidha arrimaha tacadiyada ku salaysan jinsiga(GBV). Tani waxa ay si cad uga muuqan doontaa dhammaan kulammada wacyigelinta bulshada waxayna ka mid noqon doontaa macluumaadka si guud loo shaaciyoo. Hannaanka isla-xisaabtanka iyo falcelinta hawlaha Tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV) waa in la in la sameeyo ka hor inta aan la bilaabin wax dhisme ah, sida oo kale wacyigelinta bulshada waa in loo sameeyaa si joogto ah.

6. Habka Cabashada:

Mashruucu waxa uu abuuri doonaa hab -cabasho wax ku ool ah kaas oo leh waddooyin kala duwan oo lagu mareeyo hawlaha iyo dhacdooyinka la xidhiidha Tacadiyada ka dhanka ah Jinsiga (GBV/SEAH) si looga dhigo warbixinnada kuwa sir ah, la isku hallayn karo. Baratakoolka wadaagidda macluumaadka waxaa samayn doonaa la taliye arrimaha GBV/SEAH si habka cabashada in u noqdo mid wax tar leh, sidaa daraaddeed macluumaadka wax ka qabashada dhacdooyinka la xidhiidha Tacadiyada ka dhanka ah Jinsiga (GBV) waxaa loo maarayna doonaa si taxadar leh, kalsoonida macluumaadkana waa la ilaalin doonaa. Khubarada Arrimaha GBV ee heer



qaran waxa ay samayn doonaan bulshada iyo daneeyayaasha olole wacyi-galinedd iyo habraaca Wacgelinta Bulshada (IEC) ee habka cabashada.

7. Qiimaynta iyo Dabagalka:

Mashruucu waxa uu abuuri doonaa qorshe qiimayn iyo dabagal (M&E) dhamaystiran, wuxuu sida oo kale samayn doonaa kormeer iyo qiimayn xilliga fulinta, oo ku jirto ka warbixinta horumarka.



Qorshe howleed

<i>Wax-soosaar</i>	<i>Sida wax looga qabanayo khataraha UFGX</i>	<i>Talaabooyinka la qaadayo</i>	<i>Jadwalka waqtiga</i>	<i>Masuuliyada</i>	<i>Iskaashiga/Wa saaradaha ku shaqada leh</i>	<i>Tilmaamayaasha wax soo saarka</i>	<i>Miisaaniyada lagu qiyaasay/ USD/Sannadkii</i>
<i>I. Qeex oo xooji shuruudaha GBV/SEAH ee hababka wax iibsiga iyo qandaraasyada</i>	<i>1.1. Ku darida GBV iyo SEAH shuruudaha iyo waxyaabaha laga filayo lataliyayaasha iyo Qandaraaslayaasha</i>	<ul style="list-style-type: none"> Hubi in arrimaha GBV/SEAH lagu daray dhammaan qandaraasyada ay saxeeaan qandaraaslayaasha iyo lataliyayaasha 	Ka hor inta aan hawlaha mashruucu bilaabmin	Wasraaradda Horumarinta Khayradka Biyaha/ Khuburo ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka	Wasraaradda Horumarinta Khayradka Biyaha / Baanka Aduunka	Heerarka GBV/SEASH ee dukumeentiga wax iibsiga/qandaraaska	N/A hawlaha ay qabanayaan Khubarada Wax iibsiga/GBV
	<i>1.2. Qoondaynta miisaaniy</i>	<ul style="list-style-type: none"> Si cad u qeex shuruudaha SEAH iyo waxyaabaha laga filayo dukumeentiyada tartanka 	Inta lagu jiro diyaarinta dukumentiyada	Wasraaradda Horumarinta Khayradka	Wasraaradda Horumarinta Khayradka	Dokumentiga tartanka oo si cad	



	<p>ada GBV/SEAH ee kharashyada la xidhiidha dukumeentiya wax iibsiga.</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Qiimee qandaraaslaha SEAH isla xisaabtanka iyo Qaabka Jawaabta ee C-ESMP oo xaqiiji ka hor dhamaystirka qandaraaska awooda qandaraaslaha si uu u buuxiyo shuruudaha ka hortagga GBV/SEAH ee mashruuca. 	<p>tartanka iyo qandaraaska Kormeerka haku salaysanaado saddexdii biloodba mar</p>	<p>Biyaha/ Khuburo ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka.</p>	<p>Biyaha / Baanka Aduunka</p>	<p>loo qeexay shuruudaha SEAH</p> <p>Dukumeenti qandaraas leh oo si cad loo qeexay qodobbada SEAH/shuruudaha</p>	<p>N/A</p>
--	---	--	--	--	--------------------------------	--	------------



2. Review the IA's capacity to prevent and respond to GBV/SEAH	2.1. Shaqaalayso La-taliye GBV aqoon u leh ama xirfado gaar ah oo GBV/SEAH ah si ay u taageeraan hirgelinta iyo ilaalinta shuruudaha maaraynta khatarta GBV/SEAH	<ul style="list-style-type: none"> TOR ayaa horumaray Shaqaalayso cid takhasuska gaar ah uleh xirfadaha GBV/SEAH 	Rubuca laad ka hor inta aan la bixin kharashka hawlaha hoos yimaada Qaybta	Wasaaradda Horumarinta khayradka Biyaha	Wasaaradda Horumarinta Khayradka Biyaha	Shaqaaale aqoon iyo khibrad fiican leh ayaa la qoray GBV	60000
	2.2.Xeerarka Anshaxa waa la saxee xay oo la fahmay.	<ul style="list-style-type: none"> Qeex shuruudaha lagu daro xeerka Anshaxa ee ka hadlaya GBV/SEAH Dib u eeg CoC ee qodobbada ka ilaalinaysa GBV/SEAH Hayso Xeerka anshaxa oo ay saxee xaan dhammaan kuwa jooga goobta mashruuca. Ku tababar shaqaalaha mashruuca la xidhiidha waajibaadka dhaqan ee hoos yimaada CoCs. 	Inta lagu jiro hirgelinta Mashruuca	Khurubo GBV/ Khabiirada Ilaalinta Bulshada/GB V	Wasraaradda Horumarinta Khayradka Biyaha/ Baanka Aduunka	Boqolkiiba shaqaalaha saxiixay Xeerka Anshaxa Boqolkiiba shaqaalaha ka qayb	Qiimaha tababarka ee xeerka anshaxa. Lagu daray tababarka hanuuninta SEAH iyo qandaraasla yaasha waxaa lagu dari doonaa C-ESMP



						galay tababarka Xeerka anshaxa	
2.3. U samee tababarka hanuuninta GBV/SEAH ee dhammaan shaqaalaha. (Shaqaalaha mashruuca), qandaraaslayaasha iyo la taliyayaasha	<ul style="list-style-type: none"> • Samee qorshe tababar • Horumarinta habraaca tababarka • Samee tababar ku saabsan halista GBV/SEAH, mas'uuliyadaha, iyo shuruudaha sharciga/siyaasadda 	Rubuuca laad iyo 2aad ka dib saxiixa qandaraaska Dib u tabobar inta lagu jiro hirgelinta Mashruuca.	Shaqaaale Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) /Bulshada/ Khuburo ka socota tacadiya ka dhanka ah Jinsiga (GBV) Khabiirada Ilaalinta	Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga (GBV) iyo Baanka Aduunka	Tirada tababarada la qabtay	50000	



<p>2.3. Dib u eegis ku samee jawaabta GBV/SEAH iyo qaabka isla xisaabtanka si loogu daro Nidaamyada Eedeymaha si looga warbixiyo, shilalka GBV/SEAH iyo gudaha nidaamka la xisaabtanka kiiska kuwaas oo si cad u qeexaya shuruudaha sirta ah ee wax ka qabashada kiisaskaas.</p>	<p>Dib u eegis ku samee habraacyada GBV/SEAH si aad uga warbixiso arimaha SEAH</p> <p>La socodsii shaqaalaha iyo bulshada sida loogu wargaliyo kiisaska SEAH, jebinta CoC ee GM, iyo sida kiisaska noocaas ah loo maareeyo.</p> <p>In la sameeyo habab lagula xisaabtamayo dembiilayaasha lagu eedeeyay; tallaabo anshaxeed laga qaado</p>	<p>Kahor intaan dhismuhu bilaabmin in loo qorsheeyo meelo gaar ah</p> <p>In la joogteeyo inta mashruuca laga fulinayo.</p>	<p>Qandaraasle / Wasaaradda Horumarinta Khayraddka Biyaha / Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka</p>	<p>Wasaradda Horumarinta Khayraddka Biyaha / Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka.</p>	<p>Samaynta Nidaam la xisaabtan oo dhisan oo shaqaynaya</p>	<p>Hawlaha uu si gaar ah u PIU/GBV Specialist</p>
<p>2.4. Horumarinta qiimaynta iyo dabagalka</p>	<ul style="list-style-type: none"> In la sameeyo qorshe qiimayn iyo dabagal ah oo dhamaystiran si loola socdo qaybaha fulinta Horumarinta ballanqaadka heerka sare ah ee la socodka fulinta qorshe 	<p>Rubucca laad ka dib saxiixa qandaraaska</p>	<p>Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada</p>	<p>Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) iyo qiimaynta iyo dabagalka</p>	<p>Qaab dhismeedka Qiimaynta iyo Dabagalka</p>	<p>Waxqabadka, si gaar ah PIU /GBV Specialist</p>



		hawleedka SEAH si loo taageero dadaalka lagu bixinayo	La joogteeyo inta mashruuca laga fulinayo	ka dhanka ah jinsiga (GBV)			
--	--	---	---	----------------------------	--	--	--

<p>3. Inform project affected communities about GBV/SEAH risks</p>	<p>3.1 Wadatashiga Daneeyayaasha Sida (Wasaaradaha ay khuseyso, Maamaulada Degmooyinka, Adeeg bixiyaasha GBV, Maamulada Deegaanka sida Odayaasha VDCs, iyo qaybaha kale ee bulshada sida</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Si rasmi ah ugu wargeli daneeyayaasha qaybaha mashaariicda ay ka koobanyihiin iyo khatarta mashruuca. • Ku wacyigeli daneeyayaasha khatarta GBV/SEAH iyo halka laga raadsado adeegyada lagu kalsoonaan karo 	<p>Ka hor inta aan la bilaabin hawlaha la xidhiidha dhismaha gaarka ah ee goobta.</p>	<p>Shaqaaale Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) /Bulshada/</p>	<p>Khuburo ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada</p>	<p>Tirada la tashiyada daneeyayaasha ee la sameeyay</p>	<p>30000</p>
---	---	--	---	---	--	---	--------------



	<p>haweenka Dhainyarada, dadka lixaad-ka la' dadka laga tiro badanyahay, beeraleyda, xoolo dhaqatada, IWM)</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Diyaari warbixinnada booqashada goobta. 	<p>La ilaaliyo inta mashruuca laga fulinayo. - Sanadle</p>	<p>Khuburo ka socota tacadiya ka dhanka ah Jinsiga (GBV)</p>	<p>ka dhanka ah jinsiga (GBV)</p>		
	<p>3.2. Dhisidda wacyiga bulshada ayadoo la qaybinaayo kooxo kala duwan sida (beerayleey, Xoolo dhaqato, shaqaalaha Caafimaadka bulshada) si ay u fahmaan xaalaha GBV iyo sida ugu haboon ee looga jawaabo.</p>	<p>Dhisidda wacyiga bulshada</p>	<p>Dhismuhu inta uuna biaaban kahor-Goob gaar ah</p> <p>La ilaaliyo inta mashruuca laga fulinayo - sanadkii laba jeer</p>	<p>Khabiir ka socda PIU/GBV iyo khuburo ka socota PIU Social/GBV</p>	<p>Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga (GBV)</p>	<p>Tirada kulamada bulshada ah ee la sameeyay</p>	<p>Kharashka hoos yimaada wadatashiyada daneeyayaasha</p>
	<p>3.3. samee habraacka istaarsiinta bulshadam sida Bodhadhka iyo sawir gacmeedyada si loo abaabulo bulshada</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Diyaari Habraaca Wacyi galinta sida Bodhadhka iyo sawirada oo lagu tarjumay luuqadaha laga fahmi karo Goobta mashruuca laga fulinaayo 	<p>Rubuc 1-aad ee saxiixida qandaraaska</p>	<p>Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo</p>	<p>Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada</p>	<p>Tirada iyo nooca GBV/SEA Habraac yada wacyi gelinta oo la sameeyay</p>	<p>30000</p>



		<ul style="list-style-type: none"> habraacka Isgaarsiinta iyo Bodhadhka waa in laga taagaa Agaaga Dhismaha <p>Habraacka Wacyigelinta waa inay ku jiraan Macluumaad muujinaya ka jawaabida GBV-ga</p>	La ilaaliyo inta mashruuca laga fulinayo .	Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga (GBV) iyo PIU Social/GBV specialist	ka dhanka ah jinsiga (GBV)		
4. Map out GBV/SEAH prevention and response service providers	4.1. Horumari/ wax ka badal dhinacyo badan leh ku samee hababka soo gudbinta si ay u caawiso helitaanka Tacadiyada ka dhanka ah Jinsiga/ uga faa'iidaysiga Xadgudubyada jinsiga.	<ul style="list-style-type: none"> Iyadoo lagu salaynayo khariidad bixiyayaasha ka hortagga iyo ka jawaab celinta GBV waxaa la horumariyaa/cusboonaysiiyaa liiska tixraaca ee adeeg bixiyayaasha oo ku salaysan goobaha mashruuca. Samee Hababka gudbinta oo qeexaya shuruudaha muhiimka ah ee ka warbixinta kiisaska haddii ay soo baxaan tallaabooyinka badbaadada, anshaxa iyo jawaabaha udub dhexaad u ah badbaadaha. 	Dhismuhu inta uuna bilaaban kahor-Goob gaar ah	Adeeg Bixiye GBV, Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU), Waaxda Hirgelinta Mashruuca	Degmooyinka oo si joogta ah uu shaqaynaya Korjoogto ka socota Wasaaradda shaqo gelinta arrimaha bulshada iyo qoska iyo Xuuqal Insaanka	hababka gudbinta oo la sameeyay/la cusboonaysiiyay Tirada/nooca GBV/SEA ee ka hortagga iyo adeegyada jawaab celinta ee la heli karo.	Shaqada waxaa qabanaya Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) Iyo Tacadiyada ka



		<ul style="list-style-type: none"> • Aqoonso daldaloolada muhiimka ah ee tallaabooyinka hagaajinta looga baahan karo • U faafi hababka soo gudbinta/liiska dadka ay khusayso oo ay ku jiraan adeeg bixiyayaasha 		(PIU) Iyo khuburo ku taqasustay Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga (GBV)		Tirada u gudbinta shilalka SEAH ee mashruuca GM ee adeeg bixiyayaasha kale	dhanka ah jinsiga (GBV)
5. GBV/SEAH sensitive channels for reporting in GM	5.1. Hormari/dib u eeg/ xooji GM gaar ahaan Nidaamyadda Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga/uga faa'iidaydiga xad gudubyada Jinsiga	<ul style="list-style-type: none"> • Samee dib-u-eegis gudaha ah oo GM ah si loo yareeyo GBV/SEA • Aqoonso oo Isku-dubarid GBV/SEA meelaha laga soo galo GM-ka oo leh habab cad iyo habraac loogu talagalay maaraynta cabashooyinka la xidhiidha • Samee/dib u eegis SEA/xooji Hababka ee deymaha GBV si aad uga warbixiso arrimaha SEAH • Samee oo cusboonaysii siidaynta iyo Habraaca warbixinta GBV/SEAH oo leh 	Dhismuhu inta uusan bilaaban kahor	Khabiir ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga (GBV)	Wasaarada Tamarta iyo Biyaha / Khuburo ku taqasustay Tacadiyada ka dhanka ah Jinsiga (GBV)	GM with GBV/SEA procedure integrated In the GM	(shaqada waxa qaban doona qof Takhasuska u leh GBV sidaas awgeed uma baahna kharash)



		<p>bixinta ilaalinta iyo gargaarka dhibbanaha.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Abuur dariiqooyin warbixineed oo ay ku jiraan nidaamyada taageerada iyo hababka isla xisaabtanka oo ay ku jiraan sida saxda ah ee eedeymaha SEAH loo maareeyo • Samee nidaam raadraac fudud, qarsoodi ah oo lagu kalsoonaan karo oo GM ay isticmaali karto si ay u diiwaangeliso marka ay indha-indheeyaan ama taageraan oo ay u gudbiyaan shilalka GBV bixiyeyaasha adeegga. 					
5.2. u tababar shaqaalaha GM sida loo maareeyo	Kiisaska Tacadiyada ku salaysan jinsigga /uga faa'iidaysiga xad-gudubyada ka dhanka ah Jinsiga iyo tixraacyada sida	<ul style="list-style-type: none"> • Aqoonso oo dooro GBV/SEAH dadka u xilsaaran inta lagu jiro Habka Cabashada (GM) • Ku tababar hawl wadeenada GM aasaasiga GBV/SEAH, dariiqa gudbinta, warbixinta iyo qarsoodinimada xogta 	<p>Inta lagu jiro Rubuca laad ka dib saxiixa qandaraaska shaqada</p> <p>Dib u tababar inta lagu jiro hirgelinta</p>	<p>Shaqaaale Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) /Bulshada/ Khuburo ka socota tacadiya ka</p>	<p>Khuburo ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada ka</p>	<p>Tirada howl-wadeenada la tababaray</p>	20000



	lagu qeexay habka soo gudbinta.		mashruuca - Afar biloodle	dhanka ah Jinsiga (GBV)	dhanka ah jinsiga (GBV)		
5.3.	Faafi macluumaadka ayadoo la raacayo Tacadiyada ka dhan ah jinsiga GM hababka ka warbixinta	<ul style="list-style-type: none"> Ku wargeli shaqaalaha iyo bulshada sida loogu warbixinyo kiisaska SEAH, jebinta Xeerka Anshaxa ee Habka Cabashada (GM), iyo sida kiisaska noocaas ah loo maareeyo. 	Mashruuca oo dhan - Afar biloodle	Shaqaaale Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) /Bulshada/ Khuburo ka socota tacadiya ka dhanka ah Jinsiga (GBV)	Shaqaaale Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU) /Bulshada/ Khuburo ka socota tacadiya ka dhanka ah Jinsiga (GBV)	Tirada fadhiyada lala yeeshay shaqaalaha iyo warbixinta	(shaqada waxa qaban doona qof Takhasuska u leh GBV sidaas awgeed uma baahna kharash)
5.4.	dib u eegis ku samee warbixintada Xasaasiga ah ee Tacadiyada ka dhanka ah jinsiga/uga	<ul style="list-style-type: none"> Dib u eeg diiwaanka dukumeentiyada GBV/SEA si loo hubiyo inay raacdo heerarka diiwaan gelinta kiisaska GBV/SEA 	Inta lagu jiro hirgelinta mashruuca .- Bille	Wasaarada Tamarta iyo Biyaha XFS	Khuburo ka socda waaxda Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (PIU) Iyo Tacadiyada ka	Tirada Tacadiyada ka dhanka ah Jinsiga ee la diiwaan galiyay	(shaqada waxa qaban doona qof Takhasuska u leh GBV sidaas awgeed uma



	faa'iidsiga xad gudubyada Jinsiga				dhanka ah jinsiga (GBV		baahna kharash)
--	--------------------------------------	--	--	--	---------------------------	--	---------------------